## *SUURAT AN-NAAZICAAT:*

***Magaca Eebe yaan ku bilaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista.***

1. ***Eebe wuxuu ku dhaartay Malaa'igta nafta si daran uga siibta ( gaalada )***
2. ***Iyo tan si fudud uga qaadda ( mu'miniinta )***
3. ***Iyo Malaa'igta hawada dabaalata ( si amar fulin )***
4. ***Iyo tan u orotanta wanaagga***
5. ***Iyo kuwa maamula amarka ( Eebe )***
6. ***Maalinta ay gilgilan afuufka ( hore )***
7. ***Oyna raaci tii dambe ( waa sugantahay )***
8. ***Qalbiyaduna Maalintaa way cabsan***
9. ***Araggeeduna wuu dullaysnaan***
10. ***Waxayna dhihi ( gaaladu ) ma raadkiibaa naloo celin ( Adduunkii )***
11. ***Markaan noqonno lafo duugoobay***
12. ***Waxay dheheen taasi waa noqosho khasaara ah***
13. ***Waa uun Hal Qaylo kaliya***
14. ***Dadkuna markaas ay dhulka kor iman***

***Sharaxda Suurrada ( 1 )***

Eebe wuxuu ku dhaartay Malaa'igta siduu wax badan khalqigiisa ugu dhaartay in Qiyaamadu wax sugan tahay dhibaatana leedahay Eebe cid uu ka koriyo mooyee, dadkana waa la soo kulmin si loo abaal-mariyo. Eebe abuuriddoodii karayna kama daalo inuu soo bixiyo wayna u fufuddahay.
Tirmidi wuxuu wariyay: in Rasuulkii Eebe "Naxariis iyo Nabadgalyo Korkiisa Eebe ha yeelee" markuu tago habeenka daloolkiis wuu istaagi jiray, wuxuuna

dhihi jiray: Dadoow xusa Eebe Afuufiddii hore timid tii dambena way raaci, Geerina timid iyo wixii ku dhex sugan.

***15. Ma ku soo gaadhay warkii ( Nabi ) Muuse***

***16. Markii Eebe uga yeedhay Toggii barakaysnaa ee Dhuwa***

***17. Kuna yidhi u tag Fircoon wuu xadgudbaye***

***18. Oo ku dheh ma rabtaa inaad daahir noqotid***

***19. Oon Eebe jidkiisa kugu hanuuniyo kana yaabtid***

***20. Wuxuuna tusiyay ( Nabi Muuse ) Aayd wayn***

***21. Wuuse beeniyay oo caasiyay ( Fircoon )***

***22. Wuuna jeedsaday isagoo xumaan la socda***

***23. Wuxuuna kulmiyay ( askartii ) una qaylyay***

***24. Isagoo dhihi waxaan ahay Eebihiinna sare***

***25. Markaasaa Eebe ciqaabay Aakhiro iyo Adduunba***

***26. Arrintaasna waano yaa ugu sugan ruuxii Eebe ka yaabi***

***Sharaxda Suurrada ( 2 )***
Nabi Muuse wuxuu Eebe faray inuu dadkii Masar dagganaa xaqa ugu yeedho hase yeeshee Fircoon oo xukunka haystay yaa ka hor joogsaday, uguna yeedhay inay isaga addeecaan, mar hadduu awoodda sare isagu leeyahay, ugu dambayntiise Fircoon iyo colkiisiiba waa la halaagay waxaana dhulkii u hadhay Nabi Muuse iyo intii la jirtay ee xaqa rumaysay, taasina waxay ku tusin in xumaantu tagi xaquna hadhi.

***27. Ma idinkaa daran abuuridda mase Samada Eebaa dhisay***

*28. Korna yeelay jurmiggeeda ekeeyayna*

*29. Habeenkeedana madoobeeyay Maalinteedana soo bixiyay ( ifiyay )*

*30. Dhulkana markaas ka dib fidiyay*

*31. Biyahiisa iyo Daaqiisana soo bixiyay*

*32. Buurahana sugay*

*33. Si aad idinka iyo xoolihiinnu ugu nacfidaan*

*34. Markay timaaddo Musiibadii waynayd ( Qiyaamadu )*

*35. Maalintaas dadku way xusuusan waxay faleen*

*36. Naarta Jaxiimana waxaa loo muujin ruuxii arki*

*37. Ruuxiise xadgudba*

*38. Nolosha Adduunyana doorta*

*39. Wuxuu ku dheelman Naarta Jaxiimo*

*40. Ruuxiise ka yaaba la kulanka Eebe naftana ka reeba hawada ( xun )*

*41. Wuxuu u dheelman Janno*

*42. Waxay ku waydiin Saacadda ( Qiyaamaha ) markay sugnaan*

*43. Maxaa ku ogaysiiyay waqtigeeda*

*44. Eebe umbuu ku dhammaan ogaansheheedu*

*45. Adugu waxaad tahay uun u digaha ruuxii ka yaabi*

*46. Waxay la mid noqon Maalintay arkaan ( Qiyaamada ) iyagon nagaanin galab iyo barqin mooyeen ( Adduunka )*

Qur'an 79: 1-46

***Sharaxda Suurrada ( 3 )***

Isagoo Eebe u nicmeeyay yaa haddana dadku beenin iyo Qiyaamadaba, markase dhabtu timaaddo Eebana la hor yimaaddo waxaa la kala aadi laba waddo, Jaxiimo iyo Janno, Qiyaamadu markay dhicina Eebaa ku cilmi leh, mase aha wax la dadajisto, waxaase wax tari wanaag la hormarsado, raaxa Adduun iyo ku raagiddiisuba waa wax yar.

Qataada wuxuu yidhi: Addunyadu way la yaraan dadka markay Aakharo arkaan.